Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo ee EBT ga Safmarka Dugsiga (P-EBT)

-iyo-

P-EBT ga Xagaaga ee Carruurta Dugsiga (**Cusub!)

Sanad Dugsiyeedka 2020-2021 (*Juun 3, 2021)*

S1: Waa maxay P-EBT?

J: Waxaa weeye guno cunto oo kumeel gaadh ah oo ay siiso dawlada federaalku qoysaska ay sameysay xidhitaanka dugsiga ee COVID-19 la xidhiidha.

S2: Yaa u qalma gunooyinka P-EBT?

J: Qoysaska Vermont ee leh ardayda caadiyan qaata cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee dugsiga ee hoos timaada Barnaamijka Qadada Dugsiga Qaran. Gunooyinka waxaa la heli karaa bil hadii ardaygu uu badanaa bisha waxa ku barto onleyn ama qaabka waxbarashada isku darka ah.

S3. Sidee ayaan u ogaanayaa hadii qoyskaygu u qalmo?

J: Dugsiga ardaygaaga ayaa go'aamin doona hadii ardaygaagu u qalmo, taas oo ku salaysan shuruudaha uu bixiyey gobolku. Dugsigu wuu kula soo xidhiidhi karaa si uu u xaqiijiyo inuu yahay macluumaadka uu hayaa mid sax ah. Fadlan ka jawaab dalabkooda. Hadii aad u qalanto, waxay kuu soo diri doontaa warqad DCF laguugu sharaxayo sida iyo goorta aad gunada heleyso.

S4: Hadii aanu u qalanno, sidee ayaanu u heleynaa gunooyinkan?

J: Hadii aad wakhtigan ku qaadato 3SquaresVT kaadhka EBT, waxaa lagugu siin doonaa gunada P-EBT kaadhkaas. Hadii kale, waxa lagu siin doonaa kaadh gaar ah oo P-EBT ah. Haddii aad hore u heshay kaadh P-EBT ah sanad dugsiyeedka 2020-2021, fadlan hayso kaadhkan waayo gunnooyinkaaga waxa lagugu siin doonaa kaadhkan. Fadlan ogsoonow *Xeerka Ka Falcelinta Coronavirus ka ee Ugu Horreyn Qoyska* ee federaalka ah in uu u ogolaaday dugsiga ilmahaaga in uu la wadaago xogta loo baahdo Waaxda Carruurta iyo Qoysaska (DCF) ujeeddadan awgeed.

S5: Waxa aan helay kaadh P-EBT gu'gii hore (2020), balse ma haysto hadda. Taasi ma mushkilad baa?

J: Maya. Kaadhadh cusub ayaa la bixinayaa sanad dugsiyeedka 2020-20201. Hadii aad ku qaadanayso gunooyinkaaga kaadhka gaarka ah ee P-EBT, fadlan hayso kaadhka cusub ee aad hesho. Gunnooyin dheeraad ah ayaa dhici karta in lagugu siiyo maadaama oo ay jirto wax ka badan hal mar oo kharash bixin sanad dugsiyeedkan.

S6: Waa la i siiyey kaadhkaygii P-EBT ee cusbaa, balse wuu iga hallaabay, waan tuuray, waa la iga xaday ama waxyeelo ayaa soo gaadhay. Maxay tahay inaan sameeyo?

J: Fadlan wac ESD si aad ugala hadasho khabiir P-EBT lambarka 1-800-479-6151 ikhtiyaarka 7 si aad u hesho kaadh beddel ah.

S7: Goorma ayaa la bixin doonaa gunooyinka?

J: Marka hore ee gunnooyinka (Sibtambar 2020-Febraayo 2021) waxa la bixiyey Abriil 2021. Gunooyinka Maarso-Juun 2021 waxaa la filanayaa in la bixiyo Julaay 2021. Taariikhahani waa kuwo is beddeli kara, fadlan markasta ka eeg websaytkan Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo ee cusub.

S8: Waa imisa gunnada P-EBT?

J: Gunnooyinku waxay ku xidhan yihiin qaabka waxbarashada ardaygaaga ee bisha:

- $119.35 bisha waxbarashada onleynka wax lagu barto.
- Gunnooyinka qayb kamid ah bisha waxbarashada onleynka ah (maalmaha qaar dugsiga, maalmaha qaar onleyn). *Gunnada qaybta ah ee Sibtambar illaa Febraayo 2021 waxa ay ahayd $71.61 bishii. Gunnooyinka qaybta ah ee Maarso – Juun waa hooseeyaan sababtuna waa dugsiyada oo ku laabanaya wax badan waxbarashada fool-ka-foolka ah gu'ga:*
    - Maarso $38.19
    - Abriil $37.51
    - Maajo $$33.42
    - Juun $30.69
- Wax gunno ah la iskuma siinayo bisha fasalka dhaxdiisa wax lagu barto.

S9: Miyaa gunada P-EBT isku mid tahay tiro kasta oo caruurta guriga jooga?

J: Maya. Gunada waxaa loo xisaabin doonaa arday kasta oo ku jira qaabkan waxbarashada oo u qalanka cuntada bilaashka ah iyo ta qiimaha jaban ee dugsiga. Gunoyinka ardaydu way ku kala duwanaan karaan.

S10: Ardaygayga waxaa wada koriya laba qoys. Sidee gunada loo heleyaa?

J: Gunada waxaa loo diri doonaa qof wayn oo ku qoran Madaxa Qoyska ee u duwaan gashan dugsiga ardayga. Waxa ay noqon kartaa qof wayn ee soo gudbiyay arjiga cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ee ardayda, ama qofka wayn ee ku qoran cida kowaad ee lala xidhiidhayo ee ku jira nidaamka dugsiga. Dugsiyadu waxay la xidhiidheen qoysaska Febraayo si ay u xaqiijiyaan cida lagu qorayo Madaxa Qoyska. Fadlan la xidhiidh dugsiga hadii ay tahay in la badalo Madaxa Qoyska.

S11: Maxaan ku iibsan karaa gunadan?

J: Ka eeg liiska agabyada cuntada ee u qalma websaytka USDA.

S12: Halkee ayaan ku isticmaali karaa kaadhkayga P-EBT?

J: Waxa aad u isticmaali kartaa inaad ku iibsato cunto meel kasta oo qaadata 3SquaresVT. Waxaa taas kamid ah booshariyada, subermaarkeetyada, tukaamada, iyo badanaa suuqa beeralayda ee Vermont. Macluumaad dheeraad ah ka oggow websaytka EBTeeDCF.

S13: Caruur iima dhigtaan dugsigan. Miyaan heleyaa gunadan?

J: Maya. Gunadan waxaa kaliya loogu talo galay qoysaska ay caruurtoodu cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban ka qaadato dugsigan ee Barnaamijka Qadada Dugsiga ee Qaran ee iminka u baahan inuu cuntooyinkaas ku cuno guriga maadaama oo uu ku jiro waxbarashada onleynka ah ama ta la isku daray.

S14: Tan ma waxa loogu talagalay kaliya caruurta ku jirta dugsiyada shacabka?

J: Maya. Dugsiyada qaar madaxa banaan ayaa ku jira Barnaamijka Qadada Dugsiga ee Qaran, oo caruurta dhigata dugsiyadaas waxay u qalmi karaan gunadan. Laakiin, dugsiyo badan oo madax banaan kuma jiraan Barnaamijka Qadada Dugsiga ee Qaran, oo ardaydoodu uma qalmaan gunooyinkan.

S15: Ka warama dugsiyada bixiya qureecda iyo qadada bilaashka ah ee siiya dhamaan ardayda iyada oo la isticmaalayo Bixinta U Qalanka Bulshada (Community Eligibility Provision, CEP) ama Bixinta 2?

J: Dhamaan ardayda ku jira dugsiyadan waxa ay heli doonaan gunada P-EBT bilaha ay ku jiraan waxbarashada isku darka ama onleynka ah. Waxa aad ka arki kartaa liis dugsiyadan ah websaytka AOE.

S16: Qof kasta oo ku jira dugsiga ilmahayga caadiyan waxa uu heleyaa qureecda bilaashka ah ee Bixinta 2. Miyaa qof walba heleyaa gunada P-EBT?

J: Maya. Gunada waxa heli kara oo keliya ardayda ku jirta dugsiyada caadiyan bixiya qureecda iyo qadada bilaashka ah iyaga oo isticmaalaya Bixinta 2 ama CEP. Hadii dugsigaagu uu caadiyan bixiyo qureec bilaash ah isaga oo isticmaalaya Barnaamijka 2, u qalanka P-EBT waxa ay ku salaysnaan doontaa u qalanka arday kasta qadada bilaashka ah ama qiimaha jaban.

S17: Dugsigeenu waxa uu siiyaa cunto bilaash ah dhamaan caruurta sanadkan. Ma waxa ay taasi ka dhigan tahay in dhamaan ardaydu ay qaadan doonaan gunada?

J: Maya. Hadii dugsiga ardaygaagu uu caadiyan aanu bixin "Cuntada Caamka ah" ee soo marta CEP ama Bixinta 2 markaa u qalanku waxay ku salaysnaan doontaa u qalanka ardayda ee mid midka ah ee cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban. Dugsiyadu waxay siin karaan cunto bilaash ah dhamaan caruurta sanadkan iyaga oo isticmaalaya Barnaamijka Adeega Cuntada Xagaaga USDA, laakiin ma keento inay dhamaan ardayda dugsigu u qalmaan P-EBT.

S18: Ilmahayga waxa uu wax ku dhiganayay guriga sanadkan. Ma u qalannaa gunada?

J: Maya. Gunada P-EBT waxa heli kara oo keliya ardayda ka diiwaangashan dugsi si caadi ah uga qaybqaata Barnaamijka Dugsiga Qadada ee Qaran. Gunada waxaa heli kara ardayda ku jira waxbarashada onleynka ah, laakiin ma heli karaa ardayda aan ka diiwaangashaneyn dugsigooga ee ka diiwaangashan waxbarashada guriga sanadkan. Ardayda ka diiwaangashan waxbarashada gurigu waxa ay weli ka heli karaan cuntooyin goobaha cuntooyinka ee furan. Booqo USDA's Meal Finder (Helaha Cuntada USDA) si aad u hesho goob cunto furan oo kuu dhaw.

S19: Waxa aan uga qaadayay qadada ilmahayga goobta *Qaado oo Latag* ee dugsigayaga ama iyaga ayaa noo keenayey annaga. Miyaan joojinayaa taas hadii aan helo gunada P-EBT? Miyay taasi iga saaraysaa u qalanka gunadan?

J: Maya. Ardayda qaata cuntooyinka maalmaha ay onleynka wax ku baranayaan waxay weli u qalmaan gunada P-EBT. Waxa aad weli qaadan kartaa cuntooyinkaas oo waanad u qalmi kartaa gunadan.

S20: Waxa aan leeyahay caruur kale oo aan ku jirin dugsigan. Ma u qalmaan gunada?

J: Maya. Gunada waxaa heli kara oo keliya caruurta ku jirta dugsiga ee caadiyan ku jira Barnaamijka Cuntada Dugsiga ee Qaran. Fadlan ka eeg Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo ee Childcare P-EBT wixii macluumaad ah ee ku saabsan carruurta u qalanta gunnada daryeelka ilmaha.

S21: Sidee ayuu u eeg yahay kaadhka P-EBT?

J. Waakan tusaale xaga hore ee kaadhku.



P-EBT
Sitaha kaadhka VT

S22: Waa maxay sababta aan u helay warqad uu la socdo lambarka ammaanka bulsho kaas oo aan kayga ahayn?

J: Haddii aad heshay kaadh P-EBT ah, ESD waxa ay u qoondeysay “lambar ammaan bulsho oo faaliso ah” ujeeddooyin ah ka shaqaysiinta kaadhkaaga. Fadlan adeegso lambarka ammaanka bulsho ee ku qoran warqadda (ee aan ahayn lambarkaaga ammaanka bulsho ee saxda ah) oo raac tilmaamahan si aad uga shaqaysiiso kaadhkaaga:

Sida aad Uga Shaqaysiinayso Kaadhkaaga:

1. Wac 1-800-914-8605 ee bilaashka ah.
2. Adeegso nidaamka awtumaatiga ah si aad u doorato bin lambar afar god ah.
3. Geli [INSERT FAKE SSN] marka lagaa dalbado inaad geliso lambarka ammaanka bulshada.
4. Marka lagaa dalbado inaad geliso taariikhda dhalashada, adeegso midka ilmahaaga ugu weyn ee ku qoran warqadda aad heshay.

S23: Caruurtaydu umay qalmin cuntada bilaashka ah ama qiimaha jaban wixii ka horeeyay COVID-19, laakiin waxa aan waayay shaqadaydii wixii intaa ka danbeeyay. Ma heli karaa P-EBT?

J: Hadii xaaladaada dhaqaale ay is badashay, waxa aanu kugu dhiiri gelinaynaa inaad dalbato:

- Gunnooyinka 3SquaresVT. Hadii aad qaadato guno bile ah, ilmahaagu waxa uu u qalmi karaa cunto bilaash ah oo dugsiga ah oo waxa aad heli kartaa gunada P-EBT.
- Cuntooyin bilaash ah ama jaban adiga oo la xidhiidhaya dugsiga ilmahaaga. Waxa aad sidoo kale ka heli kartaa foomka weybsaytka AOE. Hadii qoyskaaga loo arko inuu u qalmo gunada, waxa aad heli doontaa gunooyinka P-EBT bilaha uu ardaygaagu uu ku jiro waxbarashada isku darka ah ama waxbarashada onleynka ah. Arjiga la ansixiyay ee loo soo gudbiyay dugsigaaga Abriil 1, 2021 waxa loogu qalmi karaa gunnooyinka laga soo bilaabo ilaa Sebtember 2020. Wixii ka danbeeya Abriil 1, arjiyada la ansixiyay waxa uu ardaygu ugu qalmi doonaa kaliya gunooyinka wakhtigan iyo kuwa bilaha soo socda.

S24: Sidee ayay noqonaysaa hadii aanan doonaynin gunadan?

J: Kaqaybgalku waa ikhtiyaar. Hadii aad doorato in aanad ka qayb gelin:

- Ha isticmaalin gunooyinka dheeraadka ah ee kusoo dhaca kaadhka EBT 3SquaresVT. *AMA*
- Ka takhalus kaadhka P-EBT ee gaarka ee adiga lagu sameeyay oo jaraya miiqa birlabta ah una tuuraya kaadhka qaab ammaan ah. MA siin kartid kaadhkaaga cid kale.

S25: Gunnooyinka P-EBT wakhtigoodu ma dhici doonaa haddii aan la isticmaalin?

J: Haa. Gunnooyinka P-EBT wakhtigoodu waa uu dhici doonaa haddii aan kaadhka lagu adeegsan muddo 274 maalmood gudahood ah.

S26: Waxa aan qabaa su'aalo dheeraad ah. Halkee wax badan ka ogaan karaa?

J: Waxa aad tagtaa https://dcf.vermont.gov/esd/covid19/P-EBT ama wac 1-800-479-6151 ikhtiyaarka 7 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Fadlan la xidhiidh dugsiga ilmahaaga haddii aad qabto walaacyo gaar ah oo ku saabsan u qalanka ilmahaaga ee cuntooyinka bilaashka ah ama jaban ama aad jeclaan lahayd inaad beddesho madaxa qoyska ama cinwaanka boosta ee la adeegsan doono si loo soo saaro kaadhka.

********** P-EBT ga Xagaaga**********

S27: Waa maxay P-EBT ga Xagaagu?
J: Waa u kordhinta gunnooyinka P-EBT carruurta dugsiga inta lagu gudo jiro xagaaga.

S28: Yaa u qalma gunooyinka P-EBT ga Xagaaga?
J: Qoysaska Vermont ee leh ardayda u qalmayey intii lagu gudo jirey sanad dugsiyeedka 2020-2021 iyo kuwii ka diiwaangashanaa dugsiga Vermont laga soo bilaabo Juun. Ardayda u qalma waa kuwa u qalma cuntooyin bilaash ah ama jaban ama xaadira dugsi bixiya quraac ama qado bilaash ah iyada oo loo marayo Bixinta 2 ama CEP.

S29. Sidee ayaan u ogaanayaa hadii qoyskaygu u qalmo?
J: Dugsiga ardaygaaga ayaa go'aamin doona hadii ardaygaagu u qalmo, taas oo ku salaysan shuruudaha uu bixiyey gobolku. Dugsigu wuu kula soo xidhiidhi karaa si uu u xaqiijiyo inuu yahay macluumaadka uu hayaa mid sax ah. Fadlan ka jawaab dalabkooda. Hadii aad u qalanto, waxay kuu soo diri doontaa warqad DCF laguugu sharaxayo sida iyo goorta aad gunada heleyso.

S30: Hadii aanu u qalanno, sidee ayaanu u heleynaa gunooyinkan?
J: Hadii aad wakhtigan ku qaadato 3SquaresVT kaadhka EBT, waxaa lagugu siin doonaa gunada P-EBT kaadhkaas. Haddii aad hore u qaadatay kaadhka P-EBT 2021, waxa lagugu siin doonaa gunnada P-EBT kaadhkaas. Hadii kale, waxa lagu siin doonaa kaadh gaar ah oo P-EBT ah. Fadlan hayso kaadhkaaga P-EBT.

S31: Waxa aan helay kaadh P-EBT gu'gii hore (2020), balse ma haysto hadda. Taasi ma mushkilad baa?
J: Maya. Kaadhadh cusub ayaa lasoo saaray 2021. Hadii aad ku qaadanayso gunooyinkaaga kaadhka gaarka ah ee P-EBT, fadlan hayso kaadhka cusub ee aad hesho. Gunooyin dheeraad ah ayaa lagu dari karaa.

S32: Goorma ayaa la bixin doonaa gunooyinka Xagaaga?
J: Waxa jira laba mar oo gunnooyinka P-EBT ga Xagaaga la bixinayo:

- Marka koowaad ee gunnooyinka P-EBT ee xagaaga ee ardayda kuwaas oo hore u ah kuwo u qalma cuntooyin ah bilaash/jaban ama xaadira dugsi ah CEP ama Bixinta 2 laga soo bilaabo Juun waxa la filayaa in la soo saaro Julaay 2021.
- Ardayda ka diiwaangashan dugsiga Vermont laga soo bilaabo Juun 2021, balse kuwa la arko inay u qalmaan cuntooyin ah bilaash/jaban inta lagu gudo jiro muddada xagaaga, gunnooyinka waxa lasoo saari doonaa Sibtembar 2021.

S33: Waa intee muddada xagaaga ee loogu talagalay ujeeddooyinka codsiga cuntooyin ah bilaash/jaban iyo helitaanka P-EBT ga Xagaaga?

J: Qoysaska aan hore u ahayn kuwo u qalma cuntooyin ah bilaash/jaban waa ay codsan karaan wakhti walba illaa la gaadhayo Agoosto 16, 2021 haddii loo arko inay u qalmaanna waxa ay heli doonaan gunnada P-EBT ee xagaaga oo dhamaystiran. Qoysaska codsada cuntooyin ah bilaash/jaban kadib dhammaadka wakhtiga waxbarashada iyo marka la gaadho ama kahor Agoosto 16 waxa ay heli doonaan gunnooyinkooda P-EBT ee Xagaaga marka soo saarista ee labaad Sibtembar. Wakhtiga kama dambeysta ah ee codsiga cuntooyin ah bilaash/jaban ee loogu talagalay ujeedooyinka helitaanka P-EBT ga Xagaagu waa Agoosto 16, 2021.

S34: Waa imisa gunada P-EBT ga Xagaagu?

J: Gunnada P-EBT ga Xagaagu waa $375 ilmihii wal ee u qalma. Tani waa lacag gunno oo xaddi sugan ah oo halmar ah.

S35: Miyaa gunada P-EBT ga Xagaagu isku mid tahay tiro kasta oo caruurta gurigu yihiin?

J: Gunnada P-EBT ga Xagaagu waa $375 ilmihii u qalma.

S36: Haddii aan uga soo qaado cuntooyin ilmahayga goob *Qaado oo Tag* ah oo dugsigayaga ah ama aan adeegsado barnaamijyo cunto oo kale, miyey tahay inaan joojiyo samaynta taas haddii aan helo gunnada P-EBT ee Xagaaga? Miyay taasi iga saaraysaa u qalanka gunadan?

J: Maya. Waxa aad weli qaadan kartaa cuntooyinkaas oo waanad u qalmi kartaa gunadan.

S37: Waxa aan leeyahay caruur kale oo aan ku jirin dugsigan. Ma u qalmaan gunada?

J: Maya. Fadlan ka eeg Su'aalaha Badanaa La Is Weydiiyo ee Daryeelka Ilmaha P-EBT wixii macluumaad ah ee ku saabsan carruurta u qalanta gunnada Childcare P-EBT, oo ay ku jirto gunnada xagaagu.

S38: Ilmahaygu waxa uu ka qallin jabiyey dugsiga sare Juun 2021, ilmahaygu ma yahay mid u qalma?

J: Haddii ilmahaagu ahaa mid u qalma cuntooyin ah bilaash/jaban Juun 2021, ilmahaagu waxa uu noqon doonaa mid u qalma gunnada P-EBT ee xagaaga.

S39: Ilmahaygu waxa uu ka qallin jabiyey dugsiga sare horraantii Janaayo 2021, ilmahaygu ma yahay mid u qalma?

J: Maya. Si uu u noqdo mid u qalma P-EBT ga Xagaaga, ilmuhu waa in uu yahay mid ka diiwaangashan dugsiga laga soo bilaabo Juun 2021. Maadaama oo ilmahaagu uu qallin jabiyey Janaayo, looma tixgelinayo in uu yahay mid diiwaangashan Juun.

S40: Miyey tahay ilmahaygu in uu xaadiro dugsi xagaa si uu u noqdo mid u qalma P-EBT ga Xagaaga?

J: Maya. Xaadiritaanka dugsi inta lagu gudo jiro xagaagu ma aha qodob lagu go'aamiyo in ilmahaagu yahay mid u qalma P-EBT ga Xagaaga.

S41: Gunnooyinka P-EBT ga ee Xagaagu miyaa wakhtigoodu dhacayaa haddii aan la isticmaalin?

J: Haa. Gunnooyinka P-EBT wakhtigoodu waa uu dhici doonaa haddii aan kaadhka lagu adeegsan muddo 274 maalmood gudahood ah.

S42: Ilmahaygu waxa uu u qalmaa cuntooyin ah bilaash/jaban balse waxa uu wax u baranayey qaab fool ka fool ah sanad dugsiyeedkii 2020-2021, ilmahaygu ma yahay mid u qalma P-EBT ga xagaaga?

J: Haa. U qalmitaanku waxa uu ku salaysan yahay u qalmitaanka cuntooyin ah bilaash/jaban.

S43: Waxa aan qabaa su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan P-EBT ga Xagaaga. Halkee wax badan ka ogaan karaa?

J: Waxa aad tagtaa https://dcf.vermont.gov/esd/covid19/P-EBT ama wac 1-800-479-6151 ikhtiyaarka 7 si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Fadlan la xidhiidh dugsiga ilmahaaga haddii aad qabto walaacyo gaar ah oo ku saabsan u qalanka ilmahaaga ee cuntooyinka bilaashka ah ama jaban ama aad jeclaan lahayd inaad beddesho madaxa qoyska ama cinwaanka boosta ee la adeegsan doono si loo soo saaro kaadhka.

VERMONT
AGENCY OF HUMAN SERVICES
DEPARTMENT FOR CHILDREN & FAMILIES

VERMONT
AGENCY OF EDUCATION